



Dhameystirka 2018

Miiska ku jira

Macluumaadka loogu talo galay dadka shaqeyya	1
Macluumaadka loogu talo galay dadka qaata macaashka Lambarka Bulshada	2
Macluumaadka loogu talo galay dadka qaata Kabitaanka Dakhliga (SSI)	3
Macluumaad loogu talo galay dadka heysta Medicare	3
La Xiriirka Lambarka Bulshada	4

Dhameytirkani waxa la idinkugu soo gudbinayaa macluumaad dheeraad ah ee 2018 oo ay ku saabsan yihiin canshuurta Lambarka Bulshada iyo macaashka. Sharci ahaan, tiradu waa mid isbedasha sanad kasta si barnaamijku u noqdo mid la socda qiimaha iyo heerka mushaharka.

Macluumaadka loogu talo galay dadka shaqeyya

Lambarka Bulshada iyo Canshuurta Medicare		
<i>Canshuurta Lambarka Bulshada</i>	<i>2017</i>	<i>2018</i>
Shaqaaale/Loo Shaqeeye (mid kasta)	6.2% ilaa qofka dakhligiisu yahay ilaa \$127,200	6.2% ilaa qofka dakhligiisu yahay ilaa \$128,400
Qofka iskiis u shaqeysta *waxaa lagu yareyn karaa sharciyada canshuurta	12.4%* ilaa qofka dakhligiisu yahay ilaa \$127,200	12.4%* ilaa qofka dakhligiisu yahay ilaa \$128,400
<i>Canshuurta Medicare</i>	<i>2017</i>	<i>2018</i>
Shaqaaale/Loo Shaqeeye (mid kasta)	1.45% dakhliga oo dhan	1.45% dakhliga oo dhan
Qofka iskiis u shaqeysta *waxaa lagu yareyn karaa sharciyada canshuurta	2.9%* dakhliga oo dhan	2.9%* dakhliga oo dhan
Dadka dakhligoodu badan yahay waxay sidoo kale bixiyaan 0.9 boqolkiiba canshuurta Medicare oo dakhligoodu k sareeyo kuwa kor lagu soo sheegay. Faahfaahin dheeraad ah kala xiriir Waaxda Adeegga Canshuuraha.		

Lambarka Bulshada iyo Canshuurta Medicare

Tixgelinta shaqada

Marka aad shaqeyso, tixgelin (abaaalmarin) ayaad kaga heleysaa macaashka Lambarka Bulshada. Waxa aad u baahan tahay inaad gaarto darajo go'an (dhibcood) si aad xaq ugu yeelato in ad hesho macaashka Lambarka Bulshada. Dhibcaha aad u baahan tahay waxa ay ku xiran tahay da'daada iyo nooca macaashka ee aad codsaneyso. Ugu yaraan shan dhibcood ayaad heli kartaa sanadkii. Dadka intooda badan waxa ay u baahan yihiin in ay gaaraan 40 dhibcood si ay xaq ugu yeeshaan macaashka.

	2017	2018
	\$1,300 waxa ay u dhigantaa hal dhibic	\$1,320 waxa ay u dhigantaa hal dhibic

Macluumaadka loogu talo galay dadka qaata macaashka Lambarka Bulshada

Xadidaadda Dakhliga

Sida uu dhigayo sharciga dawladda dhexe, dadka qaadanaya macaashka Lambarka Bulshada oo aan weli gaarin da'da hawlgabka waxa ay xaq u leeyihiin in ay qaataan macaashka tan iyo inta uu dakhligoodu ka hooseeyo sida hoos ku cad. Dadka dhashay 1943kii ilaa 1954kii da'da ay hawlgab buuxa ku noqon karaan waa 66. Da'da hawlgabka buuxa waa ay kordheysaa si tartiib tartiib ah sanad kasta ilaa gaarto 67 dadka dhashay 1960kii ama ka dib.

	2017	2018
Da'da hawlgabka buuxa ama ka weyn	Xad ma laha dakhliga soo gala	Xad ma laha dakhliga soo gala
Ka yar da'da hawlgabka buuxa	\$16,920 \$2 ee kasta ee uu ka sareeyo xadka, \$1 ayaa laga goosanayaa macaashka.	\$17,040 \$2 ee kasta ee uu ka sareeyo xadka, \$1 ayaa laga goosanayaa macaashka.
Sanadka uu gaarayo hawlgab buuxa	\$44,880 \$3dii doolaar ee uu ka sareeya xadka, \$1 ayaa lagaaga goosanayaa macaashka ilaa bisha aad ka gaareyso hawlgabka buuxa.	\$45,360 \$3dii doolaar ee uu ka sareeya xadka, \$1 ayaa lagaaga goosanayaa macaashka ilaa bisha aad ka gaareyso hawlgabka buuxa.

Xadidaadda dakhliga dadka qaata macaashka naafada: Haddii aad shaqeyso adiga oo qaadanaya macaashka naafada, waa in aad na soo wargelisaa dakhliga kaa soo gala xitaa haddii uu yahay mid aad u yar. Waxaa laga yaabaa inaad xad lagugu soo rogin mudada aad ku jirto xilliga tijaabada ee shaqada ilaa sagaal bilood (muhim ma aha in ay isku xigaan) waadna qaadan kartaa macaash buuxa. Marka ay kuu dhamaato sagaalka bilood ee tijaabada, waxa aan go'aan ka gaareynaa haddii aad weli xaq u leedahay inaad qaadatid macaashka naafada. Waxaa kale oo laga yaabaa inaad xaq u yeelato waxyaabo kale oo dadka shaqada ku dhiiri geliya si ay kaaga caawiyaan xilliga aad shaqada dib ugu noqoneyso.

	2017	2018
Dhaqdhaqaaq la taaban karo (aan ku qabaneyn)	\$1,170 bil kasta	\$1,180 bil kasta
Dhaqdhaqaaq la taaban karo (ku qabanaya)	\$1,950 bil kasta	\$1,970 bil kasta
Bilaha aad tijaabada ku jirto	\$840 bil kasta	\$850 bil kasta

Macluumaadka loogu talo galay dadka qaata Kabitaanka Dakhliga (SSI)

Lacagta SSI ee dawladdu bixiso bil kasta		
	2017	2018
Qofkii	\$735	\$750
Labadii qof	\$1,103	\$1,125
Xadka dakhliga bil kasta		
	2017	2018
Dadka dakhligu ka soo galo mushahar kaliya	\$1,555	\$1,585
Dadka aanu dakhligu ka soo galin mushahar	\$755	\$770
Labada qof dakhligu ka soo galo mushahar kaliya	\$2,291	\$2,335
Labada qof oo dakhligu aanu ka soo galin mushahar	\$1,123	\$1,145
<p>FIIRO GAAR AH: Haddii uu ku soo galo dakhli, guud ahaan macaashka lagu siiyo bisha waa uu ka yaranaayaa inta ugu badan ee ku xusan lacagaha SSI ee dawladda dhexe bixiso. Xusuusnoow, waa in aad na soo wargelisaa dakhliga ku soo gala oo dhan. Gobolada qaar ayaa lacag dheeraad ah ku dara lacagaha SSIga. Haddii aad degan mid ka mid ah goboladaas, waxaa laga yaabaa in lacag dheeraad aad xaq u yeelato. Dakhliga ku soo gala waa ka badnaan karaa xadka la soo sheegay waxaana suurtagal ah in aad weli xaq u yeelato.</p>		

Macluumaad loogu talo galay dadka heysta Medicare

Inta badan kharashka Medicare waa kordhaya sanadkan si ay ula saanqaado kharashka caafimaadka ee kordhaya		
	2017	2018
Ceymiska isbitaalka (Qaybta A)		
60ka maalmood ee ugu horeeya isbitaalka, bukaanku waxa uu bixinayaa	\$1,316	\$1,340
maalinta 61aad ilaa 90 maalmood ee isbitaalka, bukaanku waxa uu bixinayaa	\$329 malintiiba	\$335 malintiiba
Haddii bukaanku ku jiro isbitaalka in ka badan 90 maalmood, waxa bukaanku bixinayaa (ilaa 60 maalmood oo dheeraad ah)	\$658 maalintiiba	\$670 maalintiiba
20ka maalmood ee ugu horeeya ee la dhigo dhisme leh kalkaaliye caafimaad, bukaanku waxa uu bixinayaa	\$0	\$0
Maalinta 21aad ilaa 100aad ee la dhigo dhisme leh kalkaaliye caafimaad, bukaanku waxa uu bixinayaa	\$164.50 maalintiiba	\$167.50 maalintiiba

Inta badan kharashka Medicare waa kordhaya sanadkan si ay ula saanqaado kharashka caafimaadka ee kordhaya

Qeybta A libsashada ceymiska: Lacagta aad bixineyso bil kasta si aad u hesho ceymiska caafimaadka ee Medicare Qaybta A waxa ay ku xiran dhibcaha aad heysato ee lambarka bulshada. Haddii aad heysato 40 dhibcood

40 dhibcood	\$0	\$0
30-39 dhibcood	\$227 bil kasta	\$232 bil kasta
Wax ka yar 30 dhibcood	\$413 bil kasta	\$422 bil kasta
Ceymiska Medicare (Qeybta B)	2017	2018
Lacagta aad bixineyso	\$134 bil kasta	\$134 bil kasta**
Qeybta kugu soo beegantay	\$183 sanadkii	\$183 sanadkii
	Ka dib marka uu bukaanka soo gaaro lacagta ku soo beegantay, Qeybta B waxa ay bixineysaa 80 boqolkiba kharashka adeegga loo qabtay	

FIIRO GAAR AH: Haddii aad heysato Medicare oo dakhligaagu yar yahay, gobolka ayaa laga yaabaa inuu bixiyo kharashka bil kasta ee ceymiska, qeybta kugu soo beeganta iyo kharashyada kale ee aad jeebkaaga ka bixiso. La xiriira xafiiska degaanka ee qaabilsan gargaarka caafimaadka (Medicaid), Adeegga dadweynaha ama Maamulka Gargaarka wixii macluumaad ee dheeraad ah.

**Lacagta aad bixineyso bil kasta waa \$134. Dadka qaarkiis oo dakhligoodu sareeyo waxaa laga yaabaa in ay bixiyaan lacag fara badan.

La Xiriirka Lambarka Bulshada

Waxaa jira dhawr hab oo loola xiriiri karo Lambarka Bulshada, oo ay ka mid tahay barta internetka, telefoonka iyo in aad tagto xafiiska. Halkan waxa aan u joognaa in aan ka jawaabno su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. In ka badan, Lambarka Bulshada waxa ay caawiyeen si ay maanta iyo mustaqbalka ugu guuleystaan iyagoo u fidiyey gargaar dhaqaale malaayiin dad ah oo halgan ugu jira noloshu.

Booqo bartayada internetka

Sida ugu haboon ee meel kasta loogala soo xiriiro kaaro Lambarka Bulshada waa adiga oo soo booqda www.socialsecurity.gov. Halkaas oo aad:

- Ka sameysan *my* Social Security xisaab oo aad kala socoto *Social Security Statement* (Warbixinta Lambarka Bulshada), ka hubiso lacagta aad shaqeysay, aad ka daabacan karto warqada xaqiijinta macaashka, ka

bedeli karto lacagta bangiga laguugu shubo, aad ka daabacan karto foomka SSA-1099/1042S iyo kuwo kale;

- Ka codsan karto caawinaad dheeraad ah (Extra Help) ee ku saabsan daawada lagu qoro ee ceymiska caafimaadka ee Medicare;
- Waxa aad ka coddsan kartaa hawlgabka, naafada, iyo macaashka Medicare;
- Aad ka hesho nuqul ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno;
- Aad ka hesho jawaabaha su'aalaha markasta la is weydiiyo; iyo
- Iyo kuwo kale oo dheeraad ah!

Adeegyada qaarkood waxa aad ku heli kartaa afka Ingiriisiga oo kaliya. Soo booqo barta Luqadaha kala duwan oo aad macluumaadka ku heli karto Af Soomaali. Waxaanu idiin heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka caawin kara waxyaabaha aad uga baahan tihiin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waxa

aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska Lambarka Bulshada.

Nagala soo xiriir

Haddii aadan heli karin internetka, waxaa jirta adeegyo dhameystiran oo aad telefoonka ku heli karto, 24ka saac, 7da cisho ee todobaadka. Nagala soo xiriir telefoonka lacag la'aanta ah ee **1-800-772-1213** ama numberka TTY, **1-800-325-0778**, haddii aad dhagaha la' dahay ama maqalku kugu adag yahay.

Haddii aad dooneyso in qof aad la hadasho, waxa aan telefoonka ka jawaabnaa inta u dhaxeysa 7da aroornimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Waxaanu ku weydiisaneynaa in aad dulqaadato mudada aan mashquulsanahay oo telefoonadu badan yihiin ama aad mudo dheer khadka ku jirto. Waxaanu rajeyneynaa on aan kuu adeegno.



Securing today
and tomorrow

Social Security Administration
Publication No. 05-10003-SO | January 2018
Dhameystirka 2018
Update 2018 (Somali)

Produced and published at U.S. taxpayer expense
Waxaa lagu soo saaray oo lagu daabacay lacagta canshuur bixiyayaasha